

Caabuqyo badan waxay iska bogsadaan daawada disha jeermiska cudurada keena la'aanteeda



Jirkaaga wuxuu badanaa iska daaweeyaa caabuqyada caadiga ah badankood.

Nidaamka difaaca jirka wuxuu saamayn waxtar u leeyahay in uu ka hortago caabuqyada caadiga ah badankood ee keena bakteeriya ama fayrasyo. Dhinaca kale ee waraaqdan daabacan, waxaad ka heli kartaa talo-siinyo ku saabsan waxa aad sameyn kartid si aad u yaraysid raaxo la'aantaada.

Daawada disha jeermiska cudurada keena waxay kaliya saamayn waxtar u leedahay bakteeriyada – waxba uma dhinta fayrasyada

Caabuqyo badan oo caadi ah waxaa keena fayrasyo, kuwaas oo ku siiyo cala-amado isku mid ah – waxaynakaliya jirayaan inta ay jiraan – caabuqyada keentay bakteeriyada. Hargayda, ifilada, daafka, qufaca, dhuun xanuunka, dheg xanuunka iyo sambuuqo xanuunka sida badan waxaa keena fayras.

Daawada disha jeermiska cudurada keena (Antibiotics) waa magac guud oo loogu talagalay noocyada kala duwan ee daaweynta loo isticmaalo in lagula dagaalamo caabuqyo. Midka aadka loo garanayo waa beela-shiriin (penicillin).

Caabuqyada fayraska keena waxay bogsoodaan ayagoon lagu daaweynin daawada disha jeermiska cudurada dhaliya. Uma bogsaneydsid si dhakhso ah haddii aad u qaadatid daawada disha jeermiska cudurada keena caabuuq fayras, balse waxaa jira halis ahin aad yeelatid waxyeellada sida shubanka, calool xanuun iyo firiiric. Jirkaaga waxaa ku jira bakteeriya faa'iido leh, taas oo ay disha daawada disha jeermiska cudurada keena; tani waxay fursad siinaysaa bakteeriyada keenta cudurada ama fangi kuu keeni kara in aad jiratid.

Sababtaan awgeed, waa muhiim in aan lagu siinin daawada disha jeermiska keena cudurada "si aad u joogtid dhinaca badbaadsan", balse kaliya marka aad dhab ahaantii u baahan tahay.

Bakteeriyada isdifaacda – tani dhibaato miyay ku tahay Denmark?

Bakteeriyada isdifaacda waa bakteeriya iska difaacda daawada disha jeermiska cudurada keena. Bakteeriyada isdifaaca waxay u dhalataa sababo ah in bakteeriyada ay la qabsato daawada disha jeermiska cudurada keena. Sida badan ee daawada disha jeermiska cudurada keena loo isticmaala, waa sida badan ee bakteeriyada isdifaacda u sameysanta.

Qaybo badan oo ka mid ah aduunka, bakteeriyada iska difaacda daawada disha jeermiska cudurada keena waa wax la wadaago. Sidaas awgeed waa in aad u sheegtid takhtarkaaga haddii aad ku soo xanuunsatid dibadda ama waxyar kadib marka aad guriga ku soo noqotid.

Bakteeriyada isdifaacda waxay si korortay ugu noqonaysaa dhibaato Denmark. Tani waxaa loola jeedi karaa in caabuqyada caadiga ah ee u baahan daawada disha jeermiska cudurada keena in aan la daaweyn karin sababtoo ah ma jiraan daawooyinkadila jeermiska cudurada keena oo dili kara bakteeriyada isdifaacda.

Marka lagugu daaweeyo daawada disha jeermiska cudurada keena Daawada disha jeermiska cudurada keena ee kala duwan waxay wax ka qabtaan bakteeriyada kala duwan. Ma jirto daawada disha jeermiska cudurada keena oo wax ka tarta dhammaan bakteeriyada. Sababtaan awgeed, kaliya qaado daawada disha jeermiska cudurada keena ee takhtarkaaga kuu soo qoray. Takhtarkaaga wuxuu dooranayaa nooca daawada disha jeermiska cudurada keena si uu u daaweeyo ayadoo uu ku saleynayo qiimeynta bakteeriyada la dilayo, halka caabuqa jirka uu ku yaalo. Waxaa laga yaabaa in ay daruuri u tahay takhtarkaaga in uu qaado muunad si uu u go'aamiyo haddii caabuqaaga ay keentay bakteeriyada iyo daawada disha jeermiska cudurada keena ee wax ka taraysa.

Marka lagu siiyo daawada disha jeermiska cudurada keena, waa muhiim in aad dhameysid daawada xiriirka loo qaato. Tani sidoo kale waxaa la adeegsan karaa haddii aad dareentid wanaagsanaan kahor inta aan daawada xiriirka loo qaado la dhameynin. Haddii ay ku jiraan kiniiniyo badan baakadka marka la eego inta la rabo in aad qaadatid, ku celi daawada siyaadada ah farmashiyaha. Ha qaadanin daawada disha jeermiska cudurada keena oo ay ku siiyeen dad kale, hana siinin dad kale daawada disha jeermiska cudurada keena.

Sideed isaga ilaalinaysaa caabuq?

Waxaad yarayn kartaa halista ah in aad qaadid caabuq ama in aad saameysid dadka kale adigoo gacamahaaga in badan gebi-ahaan ugu dhaqaya saabuun ama adigoo isticmaalaya gacmo dhaqa bakteeriyada ka hortaga. Isticmaal shukumaan nadiif ah hana la wadaagin shukumaan dadka kale marka aad adiga ama ayaga ay xanuunsan yihiin. Ku hindhisho kuna qufac fastaleeti la tuuri karo ama, haddii ay daruuri tahay, qacmaha shaatigaaga. Haddii aad ku hindhishootid gacamahaaga, dhaq ama ku nadiifi gacan dhaqa bakteeriyada ka hortaga.

Ma jeclaan lahayd in aad wax badan oggaatid?

Haddii aad jeclaan lahayd in aad oggaatid wax badan oo ku saabsan caabuqyo iyo isticmaalka daawada disha jeermiska, waxaad booqataa patienthaandbogen.dk iyo antibiotikaellerej.dk

Waano loogu talagalay caabuqyada caadiga ah kuwaas oo daawada disha jeermiska keena cudurada ay si dhif ah daruuri ugu yihiin

Haragbyo

Hargabyada waxaa had iyo jeer keena fayrasyo. Waxay jiri karaan ilaa labo toddobaad.

- Hubso in aad cabtid dareereyaal kaafi ah iyo in aad nasatid.
- Haddii sankaaga uu xiran yahay, waxaad isku dayi kartaa in aad yaraysid raaxo la'aanta adigoo:
 - Isticmaalaya buufis milix leh ama goojo*
 - Isticmaalidda buufiska sanka ama goojada loogu talagalay xirnaanta sanka ee farmashiyaha la isaga soo gato (ugu badnaan tobban maalmood ayadoo isticmaalka in badan dhaca/dheeraada uu sii-xumayn karo bararka xuubka duufka ee sanka);
 - Sare u qaaddida madax sariireedkaaga marka aad jiifsatid**.
- Waxaad sidoo kale wax badan ka oggaan kartaa oo hoos imaada Cune xanuun iyo Qufac.

Ifilo

Ifilada waxaa had iyo jeer keena fayras. Waxay jiri kartaa ilaa labo toddobaad.

- Hubso in aad nasatid.
- Hubso in aad cabtid dareereyaal kaafi ah; tani gaar ahaan waxay muhiim tahay haddii aad leedahay xumad heer sare ah.
- Qabooji jirkaaga haddii aad leedahay xumad (tusaale ahaan, xiro kaliya dhar yar, hoosta kagal go' marka aad seexanaysid intiiad hoos gali lahayd bustaha wayn ee sariirta la saarto, isticmaal dhar qabooban).
- Qaado xanuun baabi'iyeyaasha farmashiyaha la isaga soo gato (tusaale ahaan, Barastimool (Paracetamol)), haddii aad u baahan tahay xanuun ka bogsasho.

Qufac

Kani wuxuu si aad ah caadi ugu yahay hargabka, xaaladaas oo qufaca uu jiri karo dhawr toddobaad.

- Daawada qufaca waxay leedahay saamayn xaddidan.
- Nac-nacyada cunaha, kiniiniyada hargabka loo mud-muudsado iwm. iyo cabbitaanada kulul waxay ku siin karaan caawimo.
- Hubso in aad cabtid dareereyaal kaafi ah. Tani waxay yarayn kartaa qufacyada qalalan waxayna fududeynaysaa in la soo qufaco wixii duuf ah.
- Isku day in aad sare u qaaddid madax sariireedkaaga marka aad jiifsatid**.

Malaxda indhaha/indho gaduud (daaf)

Qaababka daafka badankood waxaa keena fayras waana khafiif. Waxaa laga bogsodaa daawada disha jeermiska cudurada keena la'aanteed. Wuxuu si gaar ahaaneed caadi ku yahay carruurta qabta hargabyada.

- Ku nadiifi isha duf suuf ah oo lagu soo qooyay biyo diirran (la doorbidayo biyo cusbo*) dhawr jeer maalintii. U isticmaal gabal cusub oo duf suuf ah il kasta.
- Waxaad sidoo kale ku shubi kartaa goojo cusbo leh ishaada*.
- Carruurta qabta daaf khafiif ah waxaa lagu soo dhoweynayaa in ay imaadaan dugsiga barbaarinta carruurta iyo xarunta daryeelka maalinlaha. Haddii cunuga uu si cad u dareemi og yahay iftiinka, uu leeyahay siidayn malax xoogan ama xaaladiisa/xaaladeeda guud la saameeyay, cunuga waa in lagu daaweeyo goojada indhaha ugu yaraan labo maalmood calaamadahana waa in ay qarsoomaan kahor inta cunuga uusan imaanin dugsiga barbaarinta carruurta iyo xarunta daryeelka carruurta.

Cune xanuun (caabuqa cunaha)

Cune xanuunyada waxaa labo xaaladood keena fayrasyomarka la eego seddax xaaladood kasta.

- Hubso in aad cabtid dareereyaal kaafi ah iyo in aad nasatid.
- Nac-nacyada cunaha, kiniiniyada hargabka loo mud-muudsado iwm. iyo cab-bitaanada kulul waxay ku siin karaan caawimo.
- Qaado xanuun baabi'iyeyaasha farmashiyaha la isaga soo gato (tusaale ahaan, Barastimool (Paracetamol)), haddii aad u baahan tahay xanuun ka bogsasho.

Dheg xanuun (caabuqa dhegta dhexe)

Dheg xanuunka sida ugu badan waxaa keena fayras, balse waxaa sidoo kale keeni kara bakteeriya.

Wuxuu si aad ah caadi ugu yahay carruurta, tusaale ahaan asagoo la xiriir hargab.

- Isku day in aad ku yaraysid dheg xanuunka adigoo sare u qaadaya madax sariireedka**.
- Qaado xanuun baabi'iyeyaasha farmashiyaha la isaga soo gato (tusaale ahaan, Barastimool (Paracetamol)), haddii aad u baahan tahay xanuun ka bogsasho.
- Sanka sida yar u cabursan wuxuu yarayn karaa dheg xanuun. Sidoo kale eeg hargabyada
- Hubso in aad cabtid dareereyaal kaafi ah iyo in aad nasatid.

San-boorka xanuunka leh (sambuuqo xanuun)

Sambuuqo xanuunka waxaa had iyo jeer keena fayras. Wuxuu jiri karaa dhawr toddobaad.

- Waxaa ku caawin kara in aad ku raacisid sankaaaga biyo cusbo* dhawr jeer maalintii. Isticmaal san nadiifiye/san mayre. Tani waxay gacan ka gaysan kartaa in ay yarayso bararka xuubka duufka sankaa sidaan awgeed waxaa jiraya hab qalajin wanaagsan oo sanqada ilaa sankaa ah. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa buufiska sankaa ama goojada farmashiyaha la isaga soo gato ee loogu talagalay sankacabursan (ugu badnaan tobban maalmood ayadoo isticmaalka sida badan u dhaca/dheeraadey uu sii-xumayn karo bararka xuubka duufka ee sankaa).
- Isku day in aad sare u qaaddid madax sariireedkaaga marka aad jiifsatid**.
- Hubso in aad cabtid dareereyaal kaafi ah iyo in aad nasatid.
- Qaado xanuun baabi'iyeyaasha farmashiyaha la isaga soo gato (tusaale ahaan, Barastimool (Paracetamol)), haddii aad u baahan tahay xanuun ka bogsasho.

La xiriir takhtarkaaga – haddii aadan dareemayn fiicnaan ama xaaladaada ay ka sii darto. Feejignaan gooni ah sii calaamadaha ilmaha yaryar iyo carruurta aadka u yar waxaadna la xiriirtaa takhtarkaaga haddii ay daruuri tahay.

Marka aad isticmaalaysid daawada farmashiyaha la isaga soo iibsado:

Had iyo jeer raac tilmaan-bixinada ku qoran baakadka ama talada takhtarkaaga. Daawo waa in aan la siinin carruurta ka yar 2 sannadood ayadoon lala tashanin takhtar.

*Waxaad iibsaa kartaa milaan cusbo oo nadiifsan. Waxaad sidoo kale sameysan kartaa biyo cusbo adigoo ku daraya hal qaandada shaaha oo siman oo cusbo ah ½ litir oo biyo karkarsan ah. Biyaha ha qaboobaan kahor isticmaalka.

** Madaxa sariireedka sariirta sare ayaa loo qaadi karaa, tusaale ahaan, ayadoo la dhigayo buugaag ama loox ama dhagax kor xardhan lugaha madaxa sariirta hoostooda ama gellinta shukumaan laalaaban ama daah dhammaanka madaxa firaashka ama barkinta.

Xusuusnow:

- Caabuqyada caadiga ah badankood uma baahna daawada disha jeermiska cudurada keena – ayaga ayaa iska bogsooda.
- Uma baahnid daawada disha jeermiska cudurada keena “si aad u joogtid dhanka badbaadsan”.
- Haddii aad qaadatid daawada disha jeermiska cudurada keena marka aad qabtid fayras, ma yaraynayso muddada jirrada, balse waxaad halis u galeysaa in aad yeelatid waxyeello.
- Daawada disha jeermiska cudurada keena badan ee aad isticmaashid, waa waynaanta halista dhalashada bakteeriyada isdifaaca.
- Cabbir heer-kulkaaga kahor inta aadan la xiriihin takhtarkaaga, haddii aad leedahay calaamado ah caabuq.
- Haddii takhtarkaaga uu ku siiyo daawada disha jeermiska cudurada keena, dhameyso daawada.
- Kaliya qaado daawada disha jeermiska cudurada keena ee takhtarkaaga kuu soo qoray.
- Haddii ay ku jiraan daawo badan baakadka marka la eego inta la rabo in aad qaadatid, ku celi daawada siyaadada ah farmashiyaha.
- Daawooyinga farmashiyaha la isaga soo iibsado qaarkood waxay yarayn karaan raaxo la’aantaada. La tasho takhtarkaaga ama farmashiilaha.